**Xukuumadda Soomaaliya**

**Xeerka 30 Setember 1956 lamba. 95 rep.**

**Meelmarinta wax ka baddalka Xeerka Hay'adda amaahda ee Xeerka Xaqa Guud (Diritto Pubblico) " "Amaahda Soomaalida".**

**Maamulaha**

Marka uu arkay xeerka 7 Maajo 1956 lamba. 1 "Dhismaha Xukuumadda Soomaalia";

Marka uu arkay dekereetada 8 Maajo 1956 lamba. 78 "Xeerka Xukuumadda Soomaaliya";

Marka uu arkay xeerka lamba. 10 ee 30 Jannaayo 1956 oo ku saabsan fidinta hawlaha Hay'adda amaahda ee Xeerka Guud "Amaahda Soomaalida.

Marka uu Dhagaystay Golaha Wasiirada fadhigoda 11 Agoosto 1956;

Marka uu Garowsaday baahida loo qabo in isbaddal lagu sameeyo xeerka Hay'adda lagu meelmariyay Dekereetada lamba. 35 ee 31 Maarso 1956;

**Wuxuu Dekereeto ku soo Saarayaa**

**Qod. 1**

Waxaa la meelmariyay Xeerka midaysan ee Hay'adda amaahda ee Xeerka Guud "Amaahda Soomaalida".

**Qod. 2**

Xeerka la soo sheegay wuxu baddalayaa Xeerka lagu meelmariyay Dekereetada lr.31 Maarso 35 ee 31 Setember 1954.

Muqdisho, 30 Setember 1956.

**Anzilotti**

**Xaaji Faarax Cali Cumar Cabdullaah** **Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

Lag hubiyay lamba. 569 30 Setember 1956.

Madaxa Xisaabiyaha: **Tura**

La Hubiyay lana Diiwaangeliyay - Diw. lamba. 19, bogga lamba. 46

Muqdisho, 30 Setember 1956.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**

**AMAAHDA SOOMAALIDA**

**<u>XEERKA CUSUB</u>**

**CINWAANKA 1AAD**

Dhismaha, Xarunta iyo Ulajeeddada

**Qod. 1**

Amaada Soomaalida, oo lagu dhisay amarka lamba. 3, 22 Febberaayo 1954, oo lagu baddalay xeerka lamba. 10 30 Setember 1956, waxaa la dhisay amaahda soomaalida e sharciga guud.

Illaa laga soo saarayo xeerka lagu diffaacayo hawlgalka keydka amahda, hawlaha Hay'addu waxay ku wajahantahay oo iskuduwaya Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha. Hay'addu waxay ka masuul noqon doontaa suurtagal ahaan sanad gudihiis oo ka bilaabata marka la baahiyo xeerka lamba. 10 ee 30 Setember 1956, qaababka shirkadaha saamilayda kuwaaso lagu dhaqayo nidaamka la xariira.

Ha-adda xarunteeda dhexe waa Muqdisho, waxayna wakiillo iyo hawlwadeenno ku yeelan kartaa Soomaaliya dhexdeeda iyo dibadda.

**Qod. 2**

Muddaad jiritaanka Hay'adda tira maleh.

**Qod. 3**

Hadafka Hay'dda waa horumarinta dhaqaalaha Dalka iyadoo ulajeeddadaas qabanaysa amaahda la siinayo beeraha, xoolaha nool, kalluumaysiga, warshadaha, farshaxanka iyo ganacsiga. Hawsha amaahda ee Hay'adda waxayay ku wajahantahay rakibaadda iyo sidoo kale hawlqabadyada daneeyaha.

Ulajeeddadaas Hay'addu, waxay qaban kartaa iyadoo leh xudduudeeda iyo dammaanad qaadka ku xusan qodobada soo, hawlgallafa idil ee bangiga ee faaidada iyo khasaaraha, qabato adeegyo gaara iyo gaar ahaan qaabka hawlgallada iyo adeegyda ku xusan cinwaanka Labaad iyo in ay ku dhisto qaybaheeda madax bannaan maarayn iyo miisaaniyadda gooni ah, ee qaabilsan warshadaha, dhismaha iyo qaybo kale ee amaahda. Dhismaha qaybaha madaxa bannaan, marka la helo oggolaashaha tala bixinta Guddiga Ilbaadinta, waxaa dekereeto ku oggolaanayaa Maamulaha marka uu sidaas ku soo taliyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha lana la dhagaysto Golaha Wasiirada. Hawgallada dadban ee dhigaalka keydka iyo xisaabta socota iyo sammaynta jeegagga wareega, waxaa lagu go'aaminayaa abuuridda keydadka oo dammaanad u ah illaa 20% (bolkiiba labaatan) hantida Hay'adda. Kaydadka u dhigma, oo lala ekaysiinayo saddex biloodlaha qorraxeedka, waxaa lagu qabanayaa Cinwaanno Dawladeed ama lacago xisaabaha socda oo gaarka oo ay ku qoranyihiin A.F.I.S oo laga furo Hay'ad bangi, kolba meelaha loogu talagalay.

Hay'addu waxay maareyn kartaa uruurinta dalagga, maydiga iyo wax soo saarka kale ee soomalida iyadoo la raacayo qaabka nidaamkooda loo dejiyay, sidoo kale la dhiso bakhaarada iyo bakaaraha iyo rakibadda qalabka adegyada lagu maareynayo iyo baaqi ahaanshaha huffan ee wax soo saarka isaga.

Hay'adda xitaa waxay kaloo maareyn kartaa adeygyo gaara, gaar ahaan kuwa ay dani ugu jirto beeraha, makiinad-falidda, waraabka, cayeyaan-buufinta, iwm.

Si loo gaaro hadafka Hay'adda waxay adeegsan kartaa wax kasta oo ku abboon oo ay ku jiraan ka qaybgalka raasamaalka ee urur-hantiyeedyada Soomaaliya ka hawlgala oo leh hadaf la mida, sidoo kale samaynta hawlgallo maguurto iyo waxyaaba kale oo leh dabeecad maaliyadeed.

## CINWAANKA 2AAD

Hawlgallada – Xeerarka Guud

### Qod. 4

Sida lagu soo sheegay faqradda saddexaad ee qodobka 3 ee sare, hay'addu waxay awoodda, si gaara, in ay samayso hawlgallada bangi ee:

A) — hawlgallada macashka le:

1) Qiima dhimis:
   - hawlo amarka kambiaalaha ee Hay'adda ama kuwa la wareejiyo, kambiyaalaha, samaynta waxyaaba fudud ama dokumentiyo, oo ay la socoto aqbalaad ama aqablaad la'aanta Soomaaliya ama dibadda, jeegagga bangiga, guud ahaan cinwanno ama dokumentiyo ka wakiila amaahyada gudaha ama kuwa caalamiga;
   - qorallada curaarta oo ay bixiyaan bakhaarada guud ama keydad daacada oo si sharciga waafaqsan loo dhisay iyo dokumentiyo kale oo badeecadaha matalaya;
   - wakiilada ama ergooyin lacagaha bixiya ee hay'adaha dawladda, canshuur uruuriyeyaasha ama khasnad hayeyaasha.
2) Daymaha iyo carbuunada:
   - bixinta liddiga ku ah wakaaladaha iyo wakiilashada lacag-bixinta in ay u qaadaan amaahda dawladda ama maamulka dadka gaarka ama hay'adaha kale oo si sharci ah loo aqoonsanyahay iyo shuraako si sharci loo sameeyay;
3) Curaarta ku saabsan:
   - cinwaanada matalaya amaahyada gudaha iyo kuwa caalamiga;
   - kalsoonida ay bixiyaan keydadka bakhaarada guud oo keydadka ama keydadka daacadda ee sifo sharci ku dhisan;
   - badeecadaha iyo dalagga iyo dukumentiyada mataladda badeecadaha;
   - keydadka lacagta xisaabaadka socda oo xorta ama shuruud ku xiran oo ku samaysmay lacag gudaha ama dibadda, oo ay sameeyeen hay'ado bangiyo kale ama hay'ado dawladeed oo ama kuwa gaar ahaaneed oo sharci ahaan la aqonsanyahay.
4) Bixinnada:
   - amaahyada xisaabta socota ee la caseeyay muddo aan ka badnayn laba iyo toban bilood;
   - furista amaahyo fudud iyo dukumentiyada, ee laga istimaali karo Soomaaliya iyo dibadda,
   - isdhaafisyada hay'adaha dawladda iyo hay'adaha si sharci ah u dhisan oo haysta caawinaadda aaminaada ama taageerada dammaanad oo ku dhamaanaysa daynbax tartiib-tartiib ah, muddoo aan ka badnayn shan sano;

- dammaanadda lagu ballan qaaday tahanta, qoondaynta ama samaynta rahanta amaah la hubo e cddaana oo uu leeyahaya maamulka dawladda amase dammaanad kale oo dhab ah;
- amaahda lagu maalgalinayo wax soo saarka beeraha ee loo uruuriyay qaybahooda ama hay'adaha dawladda danahaas u xilsaaran;

5) Ka qaybgallada:
   - raasamaalka hay'adaha dhaqaalaha uu aburay ama soo qaban qaabiyay Maamulka, hay'adaha la xariira anshaxa iyo shuraakada leh dabeecadda maaliyadeed ama wax soo saar oo si gaar u daneeya horumarinta dhaqaalaha Dalka;
   - raasamaalka shirkadaha iyo iyo uru-hantiyreedka ka hawlgala Soomaaliya oo leh hadafka qiimaynta khayraadka Dalka, iyadoo loo marayo, dhalnrogga wax qaybinta, soo dejinta iyo wax dhoofinta wax soo saarka. Maalgelinta qaybtaan kama badan karto 20% hantida Hay'adda.
6) Helitaanka:
   - Cinwaanada Dawladda ama ballanqaadyada Dawladda, heshiisyo dhulka ku saabsan, waajibaadyo kala gaar gaara, wajibaadyo ay bixiyaan dawladaha hoose, waajibaadyada shirkadaha warshadaha, ganacsiga iyo beeraha ee amarka koobaad oo leh dabeecadda iyo hadafka wax ku oola danaha dhaqaal,aha Soomaaliya;
   - maguurtoyinka iyo qalabka lagama marmaanka u ah shaqada Hay'adda iyo adeegyada iyaga loo igmaday;
   - hantida guurtada iyo maguurtada ee cid saddexaad oo lagu sameeyay dammaanad xagga daynta, oo iqtiyaar u leh in uu iibiyuhu raasmaalka lafahiisa;
7) wax qabadka:
   - amaahda ganacsiga
   - amahda beeraha ee wax-qabadka iyo wanaajinta idil si waafaqsan xeerarka jira;
   - amaahda kalluumaysiga ee dhisma, wax-qabadka wanaajinta idil ee Dalka Soomaaliya si waafaqsan xeerarka jira;
   - amaahda la siinayo farshaxanada;
   - amaahda maguurtada iyo dhismaha, oo ay qabanayaan qaybo gara oo oo madax bannaan;
   - amaahda warshadaha oo ay qabanayaan qaybo gaara oo madax bannaan;
   - amahda dhulalka oo ay qabanayyan qayb gaara oo madax bannaan;
   - amaahda hoteelada oo ay qabanayaan qayb gaara oo madax bannaan;
   - amaahda maraakiibta oo ay qabanayaan qaybo gaara oo madax bannaan. Ilaa laga soo saarayo xeerar ku saabsan diffaaca keydaka iyo wax-qabad amaahda, canshuurta dulsaarka hawlgallada faaiidada waxaa lagu go'aaminayaa dekereeto Maamulaha soo saaro marka ay talo ku soo jeediyaan Golaha Maamulka.

B) — Hawlgallada hooseeyaa:

1) oggolaashaha ah:

— curaarta keydka xitaa kuwa faaiidada dhal ah, xor ah ama xanniban, magac u yaal nooca qofka sita;
— curaarta xisaabta socota xitaa faaiida dhal ah, xor ah ama xanniban;
— xisaabta socota is shabbaha xita faaiida dhal ah, ee lacagaha gudaha iyo dibadda;

2) Soo saaridda:
— jeegaga wareega;
— waraaqaha amaahda fudud ama kuwa wareega;

3) Qiima dhismista;
— arrimaha iyo qaabka mmaliyadeed ee soomaaliya (portafoglio) ee dibada;

4) Bixinta:
— aqbalaadaha kambiyaalaha tooska ama qof saddexaad la siinayo;

5) Hambooyinka iyo qaddimaadda
— cinwaanada milkiyadda.

Illaa laga soo saarayo xeerka ku saabsan diffaaca keyda iyo hawlqabadyada amaahda, canshuura dulsaarka ee hawlgallada hooseeya waxaa lagu go'aaminayaa dekereto uu soo saaro Maamulaha uuna talo ku soo jeediyo Guddiga Maamulka.

C) — Adeegyada Hawlgallada kale:

1) lacag qabashada iyo aqbalaadda;
— waxyaabaha fudud oo dokumentiyada leh, jeegagga bangiga, cinwaanada la gudi karo iyo waraaqaha qiima dhimista, biilasha iyo guud ahaan cinwaanada iyo dokumentiyada u dhigma badeecadaha iyo amaahyada Soomaalia iyo dibadda;
2) Adeegga khasnadda iyo keydka qaranka ee ay leeyihiin wakaaladaha dawladda iyo danaha guud;
3) Maareynta adegyada uruurinta iqtiyaariga iyo midda waajibka ah ee wax soo saarka somaalida iyo meelayntooda oo ay ku jiraan dhismaha keydadka, bakaaraha iyo rakibaadda qalabka lagu maareynayo adeegyada uruurinta iyo hufnaanta baaqiahaanshaha wax soo saarka;
4) Maraynta adegyada makiinad falidda, waraabka, cayayaan buufinta oo dani ugu jirto beeraha;
5) Maamulidda dhulka iyo hantida dhinac saddexaad uu leeyahay;
6) hawlqabdyada baqaarada guud iyo kuwa kalsoonida leh;
7) Soo saaridda, tooska ah ama la soo marsiinayo qaybahooda madaxa bannaan, ee waajibaadka magaca u yaalka ama kuwa qofku uu sito;
8) keydadka haynta fudud, furan ama xiran, cinwanada, dokumentiyada qiimaha leh ee dhinaca saddexaad;
9) Qabashada curaarata, dammaanadaha, taageerada aaminaadaha cidda saddexaad;
10) Hawlgallada sarifka iyo hawlgallada la xariira, marka loo eego xudduudka iyo qaababka u degsan xeeraka jir,
11) bixinta iyo aqbalaadda wakaaladaha isi shabbaha iyo wakiilnimada hay'ado kale ee amaahd ee gudaha dalka ama dibadda ah;

12) Fulinta hawlkgal kasta ee dallaalnimada iyo dhex-dhexaadinta bangi ama hay'ad maaliyaded.

**Qod. 5**

**Xeerar Guud**

1) Hawlgallada macaashka leh:

A) Wax wadaagga rahanta ku xusan 4) faqradda affaraad ma yeelan karaan muddo ka badan shan sano iyo lacgta la siinayo wadag kasta kama badnaan karto kala barka qiimaha maguurtada rahman. Isticmaalka wadaagga rahman kama badnaan karo wadajirkoodu boqolkiiba toban hantida hay'adda.

B) Waxyaabaha sarifka kaalmada ma yeelan karaan dhacitan ka badan sanad hasayeeshe qiimaha waa la dhimi karaa.

C) Qaddimaadyada dulsaaran cinwaanada keydka ama dulsaaran kalsoonida keydka waxay soconaysaa lix bilood hasayeeshe qiimaha waa la dhimi karaa.

D) Amaahda beeraha:

Hawlaha daymaha beeraha waxa lagu samayn karan cayn ahaan ama lacag ahaan; Xaaladda daynta caynta, waxaa kambiyaalaha lagu tilmaamayaa lacagta lagu bixiyay qiimaha noocyada wax soo saarka la maamulayo ama adegyada la qabtay, kuwaaso lagu cayimayo, isla kambiyaalaha, tayada, tirada ama iyo sifooyinka waxa loo qabanayo.

Daymaha ay ku heshiiyeen urur-hantiedyada beeraha waxay xuquuq ku leeyihiin miraha ku yaalla. Xuquuqdaas waxaa isla markiiba raacaya kharashka garsoorka waxaan loogu horreynsiinaya dhammaan xuquuqdada gaarka ee ku xusan xeerarka jira. Qaddimaadyada curaarta wax soo saarka beeraha waxaa si gooniya loo samaynayaa wax soo saarayayaasha.

Iyaga waxaa loo samaynayaa qiima dhimis ama lacagta curaarta ama kambiyaalaha. Kambiyaalaha waa in lagu tilmaamaa nooca, tirada wax soo saarka curaarta lagu sameeyay, waana in lagu xusaa qoraalka curaarta lagu sameeyay.

Qaddimaadyada kama badnaan karaan kala bar qiimaha markaas uu joogo wax soo saarka keydsan waana in la dhimaa ama la baab'iyaa ka hor dhicitaanka haddii badeecadaha qayab ahaan ama giddigood laga noqday ama baaba'aday ama xumaaday.

Qaddimaadda curaarta wax soo saarka beeraha waxay dhacayaan waqtiga marka uu dhaco iibka wax soo saarka iyadoo wax dhibaata u yeelanayn wax soo saarayaasha. Daymaha lagu maamulayo urur-hantiyeedka beeraha iyo manafacaadsiga, doorista, dhalan-rogga wax soo saarka waxay dhacyaan midkasta marka la soo gooyo ama marka si dhammaystiran loo manaafacaadsado ama la dhalan-rogo wax soo saarka.

Iyagu ma haystaan muddo ka badan hal sano.

Daymaha ku saabsan helitaanka xoolaha nool, baabuurta iyo qalabka beeraha waxay gaari karaan ugu badnaan shan sano, waa in nidaam ahaan lagu dhammeeyo qayb-bixin sanadle ah. Dhammaan wixii aan lagu nidaamin xeerarkii hore, waxaa lagu dhaqayaa xitaa waxa khuseeya xayiraaadda iyo iibka hantida ay saarantahay xuquuqda gaarka, xeerarka Dalka ka jira ee arrimaha waxqabadka amaahda beeraha.

E) Go'aamada Golaha Maamulka ee ku saabsan codsiyada amaahda iyo wadaagga waa in ay ka horreeyaan baaris ku saabsan codsiyada, oo ku aadan hubinta haysashada, codsadayaasha shuruudaha sharci ee oggolaashaha, baahida lo qabo lacagta la weydiistay ee xiriirka la leh hadafka daynta ama wadaagga loo codsaday, habboonaanta marka laga eego dhinaca farsamada iyo dhaqaalaha hawlgalkaas,

qalabka maadiga iyo macnawiga ee codsaduhu uu bixiyay. Qaddarka amaahda ama wadaagg si kastaba, kama badanaan karo lacagta Guddiga Maamulka ay xaqiijintooda ku sheegeen in ay ku filantahay hadafka amaahda loo weydiistay. Ugu badnaan, muddada ay soconayso hawlgalada daynta waa shan sano, hasayeeshe cabbirka kalsoonida oo la siinayo isla magacaabidda kama badnaan karto shan meelood meel hantida Hay'adda.

Hawlgallo dano gaare u leh dhaqaalaha Dalka oo muddaddaas ka sii dheer ama leh dabeecad kala duwan, marka lag eego xagga qiimaynta halista, kuwa kor lagu soo sheegay, waxaa shardi ah oggolaasho gaara ee Maamulka, marka Guddiga Ilbaadinta ay oggoladaan, uuna soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha lana dhagaysto Golaha Wasiirada.

F) waxaan ku jirin bixinta daymaha ama is-dhafsiga kuwa an bixin daymihii hore ama hay'adda kala dhexeeyo muran ku saabsan gudasha la'aanta heshiisyadii la gaaray.

G) Hay'addu waxay iqtiyaar u leedahay in ay joojiso daymaha ama wadaagga lagu sameeyay qayb bixinta (rate), marka shaqooyinka, helitaanada iyo guud ahaan kharashka daynta ama wadagga la bixiyay aanay keenayn isticmaalka de-degga ee tirada daynta ama wadaagga oo idil.

Markaaso kale siismooyinka waxaa lagu bixinayaa kolba baahida jirta ee maalgalinta. Siismooyinka ku xiga waxa shardi u ah xubinta isticmaalka joogtada ah ee siismooyinkii hore.

H) Hay'addu waxay iqtiyaar u leedahay in ay si ku meelgaara ama gebi ahaan u joojiso bixinta wixii qayb-bixin daymaha ama wadaagga markii la xaqiijiyo in isticmaalka wax bixinnadii hore aan waxba laga helin, xitaa haddii ay jiraan sababa ka madax bannaan dayn qaadayaasha, wax faaiida ah oo ku saabsan hadafkii daynta loo qaatay.

I) Wixii ku saabsan kambiyaalaha aan ka badnay Sh. So. 3.000, suulka ayaa looga saxiixayaa dayn-qaadayasha caddeeya in aanay wax qori karin ama aan saxiixi karin sababa la xariira noofonimadooda, wax kasta waxaa ku filan marka ay goobjoog yihiin laba markhati oo awooda in ay si saxa uga qaybgalaan dokumentiyada rasmiga sida xeerku qabo saxiixoodana uu tasdiiqiyo sarkaalka Hay'adda u xilsaartay nawaaxigaas. Lacagta badan saxiixa suulka iyo saxixyada markhatiyada waa in uu soo tasdiiqiyaa notaayo ama masuulinta goobta u degganyahay dayn-qaaduhu.

L) Xaqiijinta Hay'addu ay ku baarayso codsiga daynta ama is-dhaafsiga ama dib loogu xakameynayo isticmaalka lacagta dayn-aadayaasha la siiyay iyo guud ahaan xaqiijinta leh dabeecadda farsamada ee la xariirta bixinta daymahaa, Hay'addu waxay ku bixinaysaa adeegyadeeda farsamooyinka.

Dayn-qaadayashu waa in ay oggolaadaan baarista iyo xaqiijimada idil oo Hay-addu u aragto lagama maarmaan hawlgalada amaahda ay iyadu samaynayso.

2) Hawlgalada liita:

Aan ku koobnayn hawlgalada la xariira:

a) curaarta ku xusan qod.4, B-1;
b) soo saarista jeegga wareega ee ku xusan qod. 4. B-1; faqradda koobaad;

waxaa waajib ah in la sameeyo CURAAR DAMMANAD leh, halbeegga ah 20% (boqolkiiba labaatan) marka loo eego wax ka sarreeya hantida Hay'adda. Curaarta kale waxaa lagu bixinayaa Cinwaan Dawladeed ama lacag ku jirta xisaabaha socota ee gaarka ah oo laga furay hay'adaha bangi kolba meelahaay loogu talagalay.

Faraqa xilliyeedka curaartaas dammaanadda leh waxaa lagu sameynayaa saddex biloodlaha qorraxeedka oo dib laga bixinayo, iyadoo lagu salynayo dhex-dhexaadka faraqa ka soo baxaha dhaq-dhaqaaqa billaha (loona kala soocayo saddex-saddex bilood) ee xisaabahooda guud (curaarta kobaad ee keydka – curaarta ku jirta xisaabta socota – xisaabta socota ee bangigu u ballan qaadayo daynta; xisaabta labaad biilasha lacagta wax lagu qato).

Iyada waxaa la qabanayaa iyadoo loo dirayo Guddiga Ilbaadinta, koobina, la siinayo Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha, 15 cisho dhexdeed ee bisha ku xigta saddex biloodlaha bislaaday, iyadoo la tilmaamayo tirada xisaabadka xagga sare lagu soo sheegay oo ay ansixiyeen Guddiga Baarista Hay'adda. Tilmaamahaas waxa wehliya:

a) haddii ay kororto kootada xadka damaanadda, bangiga curaarta wuxuu bixinayaa rasiid la badiyay (duplicato), oo la mida lacag bixinta la sameeyay ee faraqa tirada soo baxday.

**CINWAANKA 3AAD**

Hantida iyo Qalabka lagu Shaqeeyo

**Qod. 6**
**Hantida**

Hantida Hay'addu waxay ka koobantahay:

a) lacagta lagu bilaabay ee A. F I. S uu hay'dda ku dhisay oo ah sh So.3.200.000;
b) deeqaha xigay oo ay bixisay A. F. I. S oo ah 1.500.000;
c) dheeraadka saafiga ha ahaado mid cayn ah ama mid lambara, ee maareynta dalagga ay arurisay A. F. I. S, oo si kama dambaysa oo lacag la'aan Hay'addu ay u qoondaysay Sh. So.1.000.000;
d) wixii kaloo deeqo ah ay bixiyeen A. F. I. S iyo Xukuumadda;
e) deeqaha lacagta luntay, hibooyinka waxyaabaha xanniban iyo kuwa aan xanibnayn e nooc kasta iyo daqli kasta oo Hay'adda soo gaara;
f) dheeraadka faaiidada hawlgal kasta, cabirka iyo qaabka uu jidaynayo qod. 17 ee xeerkaan. Saddexda hawlgal ee ugu horreeya waxaa loo isticmaali karaa hawlgaladda dhisidda, ugu badnan tobankiiba sagaal lacgata la isticmaali karo ee hantida bilawga. Boqolkiiba 50% tobanleyda soo haray waxaa lagu maalgelin karaa xitaa maguurto iyo qalab si loo xoojiyo baahida shaqada Hay'adda iyo adeegyada iyada loo igmaday.

**Qod. 7**
**Waxyaabaha kale ee lagu Shaqeeyo**

A) Hay'addu waxay bixinaysaa waxqabadka hawlaheeda kalsoonida, ka sokow lacagta diyaarsan ee laga kasbay hantideeda ku xusan qod. 6, lacagaha ay haysato ee ka soo baxay hawlgalada hoos u dhaca (qod. 4) wax ku siman xudduudaha ku xusan qod. 5, cutubka 2);
B) Hay'addu si ay u gaarto hadfkeeda iyo hawgalada gaarka ee maalgalintaeebaaxadda weyn, kuna xiran horumarka dhaqaalaha iyo bulshada ee Dalka, waxaa loo carbiyay in ay soo saarto, si toosa amase iyadoo adeegsanaysa qaybaheeda madaxa bannaan, waajibyaadyo magacaaban ama nooca sitaha (al portatore), sidoo kale la galaan heshiis amaah gudaha iyo dibadda, hay'ado bangi iyo wakaalado kale ama dad gaara ee maaliyad bixiyeyaal. Hawlgaladaas waxaa lagu oggolaanayaa dekereeto Maamulaha, ka dib markii la helo waafaqsanaanta talada Guddiga Ilbaadinta, uuna soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, Golaha Wasiiraduna ay dhageysteen.

**CINWAANKA 4AAD**

**Qod. 8**

**Xubnaha Hay'adda**

Xubnaha Hay'adda waa:

a) Golaha Maamulka,
b) Guddiga Fulinta;
c) Guddiga Baarista;
d) Agaasimaha

**Qod. 9**

**Golaha Maamulka**

Golaha maamulkun wuxuu ka koobanyahay 7 xubnood, dhammaantood waxaa lagu soo magacabayaa dekereeto Maamulaha, marka uu talo ku soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, lana dhagaystay Golaha Wasiirada, waxana laga soo xulanaya xeel-dheereyaal qaybaha farsamada iyo dhaqaalaha, xilalka mid walba uu ka hayay:

| | |
|---|---|
| — Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha | Saddex |
| — Wasaradda Arrimaha Maaliyadda | Labo |
| — Wasaaradda Arrimaha Gudaha | Hal--RugtaGanacsiga, |
| — Warshadaha iyo Beeraha | Hal |

Guddoomiyaha Golaha Maamulka, Maamulaha ayaa ka dhex xulanaya Guddiga Maamulka isagoo ku soo magacaabaya dekereeto.

Iyagu xilka waxaa lagu siinayaa gunno uu soo go'aamiyo Mamulaha, marka uu helo tala soo jeedinta Golaha Maamulka.

Guddoomiyuhu xilka wuxuu haynayaa saddex sano. Xubnaha kalana xilka waxay haynayaan laba sano.

Iyaga waxaa u sugnaaday gunnada joogitaanka oo uu go'aamiyo Maamulaha, kadib marka uu helo soo jeedinta Golaha Maamulka.

Xubnaha Guddiga Maamulka xilka waa loo cusboonaysiin karaa. Xil-hayntu waxaa lala xiririnayaa bilowga hawlgalka.

Kuwooda aan ka soo qaybgalin shan fadhi oo xiriira la'aanta sabab macqula, waxay sababi kartaa in ay xilka waayaan, iyadoo lagu caddeynayo qaraar maamuleed, marka uu weydiisto Guddoomiyaha.

Sabab kasta ha ku timaaddee marka Golaha ay jago ka bannaanaato, Guddoomiyaha wuxuu codsanyaa in la magacaabo la-taliye cusub, kaasoo dhammaystiraya labadii sano oo u bilaabatay la-taliyihii la baddalayay.

Marka Guddooomiyuhu maqnyahay ama xilkiisa gudan waayo, xilka guddoomiyenimada waxa qabanaya la-taliye uu si deg-degga Maamuluhu u soo xilsaaro. Muddada la-taliyuhu xilka hayo, waxaa la siinayaa gunno uu Guddiga Maamulku soo go'aamiyo. Guddoomiyaha, xubnaha Guddiga Maamulka iyo Agaasimaha inta ay xilka hayaan sina wax waajibaad lama geli karaan Hay'adda.

Maamuluhu wuxuu awoodaa in uu ku soo saaro qaraar iqtiyaari ah in uu xilka ka xayuuiyo iyo in uu baddalo waqti kasta xubnaha Golahaa Maamulka.

Kulanka Golaha Maamulka waxaa loogu yeeraya waraaq xubnaha loogu diro deegaankooda oo ay ku qorantahay hawsha maalintaas la qabanayo, ugu yaraan shan cisho ka

hor kulanka. Xaaladaha deg-degga isku yeeridda xita waxaa lagu samayn karaa telegtaam loo diro iyadoo aan la dhowrayn waqtiga horay loo go'amiyay.

Golaha Maamulka caadiyan bishiiba mar ayuu kulmayaa.
Si kulanku u noqdo mid ansaxa waxaa loo baahanyahay joogitaanka aqlabiyadda xubnahiis.

Codbixinta, soo jeedinta Guddoomiyaha ama codsi ka yimid ugu yaraan laba xubnood, wuxuu noqonayaa mid qarsoodi. Go'aanka waxaa lagu gaarayaa aqlabiyadda inta goob joogga ah. Haddii codbixintu aan qarsoodiga ahayn waxa guulaysanaya dhinaca uu raaco codka guddoomiyuhu ama cidda kusimaha u ah. Codbixinta qarsoodiga haddii ay isla ekaato soo jeedintu waa jabaysaa.

Agaasimaha Hay'adda wuxuu qabanaya xilalka xoghaynta Golaha Maamulka, wuxuuna qorayaa maxdarka kulan kasta, fulinta hawlahaas, waxaa la wadaagi kara saraakiisha xarunta dhexe u xilsaaran.

Maxdarka waxaa lagu minguurinaya diwaan suntan sida xeerku qabo, waxaana saxiixaya Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Golaha, kuwaaso tasdiiqinaya nuqullada laga sameeyo. Dhammaan ka soo qaybgalayasha kulanka waa in ay dhowraan sirta.

Golaha Maamulka waxaa u sugnaaday:

1) In ay diyaariyaan xeerka hay'adda iyo ay ku tallaabsadaan waxii laga laga baddalayo;
2) in ay iska dhex magacaabaan labada xubnood ee Guddiga Fulinta ee Hay'adda;
3) in ay meelmariyaan iyo fuliyaan xeer nidaamka shaqaalaaha iyo hab-dhankiisa dhaqaale iyo xasilloonida shaqaalaha;
4) meelmarinta lagu dhisayo, ka saaridda iyo dhalnrogga wakiilada iyo shaqaalaha wixi la xariira iqtisaaskooda;
5) oggolaashaha nidaamyada hawlaha gaarka iyo kuwa gudaha iyo in ay soo jeediyaan wixii isbaddala;
6) soo jeediyaan tirada gunnooyinka xilalka Guddoomiyaha iyo gunnada joogitaanka la-taliyeyaasha iyo xubnaha Guddiga Fulinta iyo lacagaha Guddiga Baarista;
7) meelmarinta go'aamada lagu helayo maguurtooyinka iyo qalabka looga baahanyahay shaqada Hay'adda iyo adeegyada loo igmaday;
8) go'aaminta wixii wax looga baddalayo xudduudaha iqtisaaska Guddiga Fulinta;
9) oggolaashaha lacagaha lagu bixinayo waxtarrada loola jeedo kaalmada lacagta ka badan Sh. So. 500;
10) meelmarinta tirtiridda qoraallada amaahda aan la helikarin ee lacagaha ka badan Sh. So.2.000;
11) oggolaashaha bixinta amaahyada iyo macaamilada qaab kasta, meelmariyaan tirtiridyada, yareysmada iyo xannibaadyada rahanta iyo mudnaanta beeraha, iyo cayn kasta oo hay'adda dan u ah, sidoo kale wixii warejin loogu danaynayo dhinacyo saddexaad ee hawlgalada qaddarka midaysan ee ka badan Sh. So. 1.000;
12) meelmarinta bisha Nofember dhexdeeda sanad kasta, ku-talagalka kharashka maamulka ee hawlqabadyada ku xiga;
13) goyaan qaababka guud ee qaybì'inta amaahyada;
14) meelmariyaan bixinta daymaha iyo kaalmada la xariira hawlgalada faaiidada qayb kasta qaddarka midaysan ee ka sarreeya kan ugu badan wixii ah iqtisaaska Guddiga Fulinta;
15) meelmariyaan murannada laga keeno ama la qabo, iyagoo u oggolaanaya Guddiga Fulinta ama agaasimaha ama cid iyaga ka socota in ay dacwoodaan, sidoo kale ay ka gorgortaman ama ka tanasulaan go'aanada iyo qaraarada fulinta;

16) meelmariyaan inta lagu jiro bisha Maarso dhexdeeda sanad kasta miisaaniyadda hawlqabayadii hore, oo ay wehliyaan xisaabta khasaaraha iyo faaiidada iyo qiima dhaca ku yimid waxtarada, iyo sidoo kale hannaanada lagu qiimaynayo waxyaabaha faaiidada iyo khasaaraha miisaaniyadda iyo dayn-baxa kharashka caadiga ee rakibaadda iyo hawlqabadka dhaqaalaha sida ku xusan qod. 17 ee ku xiga;
17) soo jeediyaan soo saarista waajibaadyo, gungaarka daymaha, iyagoo goynaya qaababka, shurudaha, dammaanadaha iyo dulsaarka caqligalka ah;
18) soo jeediyaan ka qaybgalka Hay'adda ee raasmaalka urur-hantiyeedka leh hadfka lagu qiimaynayo iilaha dhaqaalaha Soomaalia;
19) soo jeediyaan hawlgallo maalgalin oo gaara, oo ku xiran horumarinta dhaqaalaha Soomaalia iyo wixii hawlagallo kale ee maguurto ah.

Guddiga maamulka, ugu dambayntii, marka uu soo jeediyo Guddoomiyaha, wuxuu u xilsaari karaa hoggaamiye ama sarkaal kale in uu xilka ka baddalo agaasimaha marka uu si ku meelgaara u maqanyahay ama ay jiraan wax ka reebaya isagoo u wakiilanayo si ku meelgara in uu wax u saxiixo.

## Qod. 10
## Guddoomiyaha

Guddoomiyaha Hay'adda:

— Wuxuu leeyahay wakiilnimada sharciga ee hay'adda, wuxuu isugu yeeraa oo guddoomiyaa Golaha Maamulka, wuxuu saxiixa qoraal-doodeeka shirarka wuxuuna ilbaadiyaa go'aamada la gaaray;
— wuxuu bixiyaa rasiidyada ay Hay'addu leedahay, isagoo ay wadajiraan agasimaha, uruurinta lacag kasta eek a sarreya Sh. So 30.000;
— wuxuu amraa, kolba xadka la meelmariyay kharashka loogu talagalay qaybta aan caadiga ahayn ee kutalagalka maaliyadeed oo ay oggolaadeen Golahu;
— wuxuu oggolaadaa, dacwadaha maxkamadaha daraja kasta iyo garsoorid kasta, isagoo awood u leh uu ka tago, ka baxo qoraallada iyo xaqa dacwooyinka iyo in uu aqbalo ka tagiddaaso kale ama dhinaca kale u tanasula dacwadda isagoo ogaysiinaya Guddiga Fulinta ama Golaha Maamulka, kolba wixii iqtisaaskooda ah. Iyadoo la eegayo xudduudka habka fulinta looga baahanyahay soo xaraynta amaahyada kambiyaalaha, agaasimuhu keli ahaantiisa wuxuu awood u leeyahay in uu maxkamadda ka dacwoodo;
— wuxuu qaataa, isaga uu la jiro agaasimaha tallaaba kasta oo uu iqtisaas u leeyihiin Guddiga Fulinta oo leh dabeecad deg-degga, marka laga reebo kuwa qodobada 11, tirada 2), 4) iyo 5) iyo baragrafka u dambeeya;
— Xaaladaha de-degga, oo aanay suurtagal ahayn in Golaha si dhaqso uu u kulmo, wuxuu qaadayaa tallaabooyinka kuwaas ay awoodda u leeyhiin, isagoo wargalinayaa fadhigooda ugu horreeya ee xiga.

## Qod. 11
## Guddiga Fulinta

Guddiga fulinta wuxuu ka koobanyahay guddoomiyaha Golaha maamulka oo shir guddoomiya iyo laba xubnood oo ka mida isla Golaha Maamulka, waxayna xilka haynayaan hal sano.

Xubnaha guddiga waxaa u sugnaatay gunnada soo xaadiridda, iyadoo cabbirkeeda ay gooynayaan Guddiga Maamulka.

Kuwooda aan ka soo qaybgalin shan fadhi oo isku xigta la'aanta sabab maxquul ah, waxay keenaysaa in ay xilka waayaan. Sabab kasta ha ku dhacdee markii Guddiga wax ka bannaanaadaan, guddoomiyuhu wuxuu isugu yeerayaa Guddiga Maamulka si ay u magacabaan xubin cusub, taasoo xilka isla markiiba ka joojinaysa xubnaha kale ee Guddiga Fulinta.

Si uu kulanka Guddiga Fulinta sax u noqdo, kaasoo dhaqan ahaan dhacaya maalinta khamiista kobaad iyo saddexaad bilkasta amase shirarka gaarka ee guddoomiyahu isugu yeero, waxaa lagama maarmaana joogitaanka aqlabiyadda xubnaha.

Marka codadku isla ekaado dhinaca uu raco codka guddomiyaha ayaa guulanaysanaya. Dood-qoraaleedka kulamada Guddiga Fulinta, oo lagu minguuriyo diiwaan gaara oo uu hayo xoghayaha guddiga, waxaa loo diyaarinayaa Guddiga maamulka, iyo xubnaha hay'adaha. Xilka xoghaynta Guddia Fulinta waxaa qabanaya sarkaal ka mid hay'adda oo uu soo magacaabo agaasimaha.

Guddiga Fulinta guud ahaan waxay diyaarinayaan maamulka caadiga ee hay'adda iyo qaybaha gaarka.

Guddoomiyaha Guddiga Fulinta si gaara waxaa u sugnaaday:

1) Go'aaminta hawlgalada wax ku oolka ee cadadka midaysan ee aan ka badnayn Sh. So. 4.000, kuwaaso lagu minguurinayo diiwaan gaara oo loo diyaariyo xubnaha maamulka iyo ilbaadinta;
2) sameeynta, marka agasimahu ku waafaqo miisaaniyadda la horgeeynayo Guddiga maamulka si ay u oggolaadaan;
3) go'aamiyaan arrimaha shaqaalaha si waafaqsan nidaamkooda;
4) go'aamiyaan in ay meesha ka saaraan qoraalada amaahyada aan la bixin Karin hawlgalada illlaa cadadka midaysan Sh. So. 2.000;
5) go'aamiyaan si nidaamsan qoritaanka adegyada khasnadda, canshuur bixinta iyo keydka qaranka;
6) oggolaadaan ku maareynta amaahyada ama macaamilada qaab kasta, go'aamiyaan tirtiridda, yaraynta iyo dib u soo celinta rahanta ama xaq gaarka leh ee beeraha ama qoraallada cayn kasta oo hay'addu dani ugu jirto, sidoo kale isku baddalidda (surrogazione) dhinacyada saddexaad hawlgallada caddadka midaysan ee ka hooseeya 10.000;
7) oggolaadaan wax bixinnada loola jeedo samafallada iyo kaalmooyinka caddadyada midaysan ee ka sarreeya Sh. So. 500;
8) magacaabaan, marka uu soo jeediyo agaasimaha, kuwa u xilsaaran wakiilada iyo awoodda loo siiyay saxiixa si waafaqsan qod. 14.

Guddiga Fulinta wuxu kaloo awood u leyahay in uu ku tallaabasado, xaaladaha deg-degga, go'aamada ay iqtisaaska yu leeyihiin Guddiga maamulka arrimaha ku saabsan qod. 9, lamba. 11, isagoo u gudbinaya kulanka ugu horreeya ee Golaha.

## Qod. 12.
## Agaasimaha

Hay'addu waxay yeelanaysaa agaasime uu soo magacaabo Maamulaha Soomaaliya, kaaso goynaya dhaqaalaha la siinayo iyo maqaamkiisa sharci, kadib marka ay soo jeediyaan Golaha Maamulka.

Agaasimuhu waa madaxa shaqaalaha iyo adeegyada hay'adda, wuxuu ka hawlgalaa go'aamada Golaha iyo fulinta amarrada Guddoomiyaha; wuxuu guddiga u soo jeediyaa xeerarka iyo adeegyada kutalagalka ee kharashka sanadlaha iyo guud ahaan dhammaan qararada lagama maarmaanka ah ama uu u arko in ay ku habboonyihiin nidaaminta iyo hagajinta habsami u socdka Hay'adda. Wuxuu awood u leeyahay in uu qaabeeyo soo jeedinta Guddoomiyaha oo ku saabsan arrimaha looga fadhiyo in Goluhu meelmariyaan.

Agaasimaha waxaa wakiilan kara Golaha Maamulka, marka uu soo jeediyo Guddoomiyaha, qayb ka mida awoodaha isla Guddoomiyaha. Xilalkaas loo wakiishay waa in ay ku caddaadaan si gaara, dood-qoraaleedka fadhiga Golaha.

Waxaa lagu dhaqayaa Agaasimaha waxyaabaha ku xusan qod. 9.

Golaha Maamulka waxay u xilsaari karaan sarkal kale ee Hay'adda in uu baddalo agaasimaha marka uu si ku meelgara u maqanyahay ama ay jiraan wax ka reebaya xilgudashada.

Agaasimaha Hay'adda wuxuu ka soo qaybgalayaa fadhiyada Golaha isagoo leh cod la-talineed. Isagu xitaa wuxuu qabanayaa xilka xoghaynta Golaha maamulka, wuxuna qorayaa dood-qoraaleedka kulan kasta.

**Qod. 13**
**Faracyadaa iyo shaqaalaha**

Faracyada iyo, xaafadaha waxay hoos imaanayaan agaasimaha. Farac kasta waxaa u xilsaaran sarkaal uu magacaabo Guddiga Joogtada, ka dib marka uu soo hordhigo agaasimaha, kaaso noqona madaxa faraca. Iyagu waxau masuul ka yihiin habsami u socodka faraca iyo farac-hoosaadka ama shaqaalaha kale ee nawaaxiga Hay'adda.

**Qod. 14**
**Awoodda Saxiixa**

Awoodda saxiixa magaca Hay'adda waxay u sugnaatay:

— gooni ahan guddoomiyaha dhammaan waraaqaha sharciyeed iyo qoraalada ku saabsan mowduucyada iyo waajibaadka mudnaanta gaara leh oo ay soo saaraan Guddiga Fulinta;
— Guddoomiyaha iyo agaasimaha waxaa u sugnaday wadajir ahaan waraaqahaa sharciyeed iyo qoraallada waajibaadka tooska ee hay'addu dhinacyo saddexaad ay u qaadday, oo ay ku jiraan kambiyaalaha iyo dhaq-dhaqaqyada lacagaha ay u qaaday bangayada iyo wakaaladaha dawladda ama kuwa gaarka loo leeyahay;
— gooni ahaan agaasimaha waxaa u sugnaaday bixinta rasiidyada lacagaha illaa Sh.. So. 30.000, waxa ku saabsan xiriirka caadiga iyo la xariirka dhinacyo saddexaad oo saamayn ku leh go'aanada Golaha maamulka iyo guddiga fulinta, sidoo kale, waraaqaha sharciyeeda iyo qoraalada ku lug leh shaqaalaha iyo xariirka kala dhaxeeya faracyada iyo shaqaalaha kale;
— Xaaladaha maqnaanshaha ama haddii ay jiraan wax ka reebaya, wixii la xariira arrimaha kala dhaxeeya iyo maamulka caadiga, waxaa loo weeci karaa awoodda, isagoo ay wehliyaan laba sarkaal ee xarunta dhexe, awoodda la siiyay Guddiga Fulinta, ka dib marka uu soo jeediyo agasimaha. gooni ahaan waxaa u sugnaatay madaxda faracyada u xilsaaran xiriirka caadiga ee gudaha, marka laga reebo kuwooda keenaya waajib dhincyo saddexaad oo wata saxiixa agaasimaha

**CINWAANTA 5AAD**
Guddiga Baarista

**Qod. 15**

Guddiga Baarista wuxuu ka koobanyahay Hantidhowraha Guud ama qof uu isagu soo wakiisho, kaasoo guddiga guddoominaya, iyo laba xubnood oo joogto ah iyo laba keyd ah, waxaana dekereto ku soo magacaabaya Maamulaha kadib marka uu soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, lana dhagaysto Golaha Wasiirada, waxayna xilka haynaya muddo laba sano waana loo cusboonaysiin karaa.

Guddiga Baarista waxay xilka ku gudanayaan si waafaqsan xeerarka dalka Soomaaliya ka jira iyago tixgalinaya dabeecadda gaar ahaaneed ururada bangiyeed.

**CINWANKA 6AAD**
Hawlgalka – Miisaaniyadda iyo Natiijooyinka Dhaqaalaha

**Qod. 16**
**Hawlgalka**

Hawlgalka sanadlaha ee Hay'adda wuxuu bilaabanayaa 1 Jannayo wuxuuna dhammaanayaa 31 Disember.

**Qod. 17**
**Miisaaniyadda iyo Natiijooyinka Dhaqaalaha**

Faaiidada saafiga ee sanadlaha, hoos u dhaca wixii la xariira dayn-baxa iyo maguurtada iyo guurtada hallowday, waxaa loogu talagalayaa sida soo socota:

a) wixii ku saabsan toban meelod saddex kororka hantida Hay'adda;
b) wixii ku saabsan toban meelood shan qaabaynta kororka lacagaha keydka;
c) wixii ku saabsan toban meelood labo abuuridda lacagaha loogu talagalay Golaha Maamulka, gunnooyinka shaqaalaha la siinayo iyo wixii kale abaalgudyo ah, kalmooyinka iyo deeqaha sida tooska loogu talagalay horumarka dhaqaalaha Dalka.

**CINWAANKA 7AAD**
Ilbaadinta

**Qod. 18**

Hay'adda waxaa ilbaadin ku sameynaya GUDDIGA ILBAADINTA, oo ka dhisan Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha, laguna dhisay Xeerka lamba. 10 Setember 1956.
Guddiga la soo sheegay wuxuu u xilsaaranyahay in uu ilbaadiyo waxqabadyada hawleed e hay'adda ee la xariira u hoggaansanaanta iyo dabaqidda xeeraka hay'ad ahaan iyo sharci ahaan, oo ay ku jiraan kuwa ku saabsan difaaca keydaka iyo nidaaminta xilka kalsoonida. Iyagu waxay markasta awooddaa kormeerka iyo xakamaynta hawlgalada kalsoonida guud ahaan iyo hawlgalada gurista dalagga iyo isticmaalka keydka.

Wakiil ka socda xubnaha ilbaadinta ayaa ka qaybgalayaa dhammaan kulamada Golaha maamulka, kaasoo awood u leh haddii uu arko in go'aan aan waafaqsanayn xeerarka hay'ad ahaan iyo sharci ahaan in u soo dhexgalo isagoo soo jeedinaya talooyin ama cawimaadyo cayiman si wax looga baddalo. Haddii aan waxba la samayn, wakiilka ilbaadinta wuxuu weydisan karaa in la baabi'yo go'aanka isaga, isagoo wargalinayaa Guddiga Ilbaadinta, kaasoo isaguna wargelinaya go'aankiisa guddoonka Hay'adda, muddo toban cisha gudahood ee maalmaha la shaqeeyo oo ka bilaabata taariikhada dood-qoraaleedka fadhiga laga hadlayo soo

garay; marka la dhaafo muddadaas, oo doodna aana laga keenin, go'aanku wuxuu noqonaya mid la fulin karo.

Soo dhexgalka wakilka ilbaadinta, wuxuu noqonayaa mid si joogta ha loo raacinayo dood-qoraaleedka mid kasta oo ka mida kulamad la-taliyeyaasha.

**Qod. 19**

Hay'addu waa inay u dirtaa Guddiga Ilbaadinta iyo Wasaarada Arrimaha Dhaqaalaha nuqul, dokumentiyada soo socda:

a) soddon cisho gudahood, xaaladaha xisaabadka bil kasta;
b) afar bilood gudahood marka ay ka soo wareegto xiritanka hawlgalada warbixinada Golaha maamulka iyo Guddiga Baarayaashata iyo xisaab xirka miisaanidda sanadlaha iyo lifaaqyada la xariira. Warbixinta Golaha maamulka waa in ay ka muuqataa dhexdeeda, barnaamijka hawlqabadka Hay'adda;
c) ugu yaraan shan cisho ka hor marka la muddeeyo ogaysiisa kulanka Golaha maamulka oo ay wehliyaan ajeendaha maalintaas;
d) saddex cisho maalmaha shaqada gudahood marka shirku dhaca, nuqulka maxdarada ku saabsan. Marka laga reebo xaaladda ku xusan qod. 18, lamba. 2, haddii shan cisho gudahood oo ka bilaabata taariikhda maxdarka la soo diray, Guddiga Ilbaadinta ma baabi'inayo go'aanka ay gaareen Golaha maamulka oo aan dood laga keenin, isagu wuxuu noqonayaa mid la fulin karo. Haddii kale go'aamadu waxay dhaqan galayaan keliya ka dib si cad marka ay u oggolaato xubinta ilbaadinta oo ay ku raacdo Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha;
e) 15 cisho gudahood ee bisha xigta saddex biloodle qorrexeed kasta, lacag bixinada la xariirta dhellitirada keydadka dammaanadda ee ku saabsan hawlagalada hoos u dhaca (keydadka iyo jeegaga la sameeyay).

**Qod. 20**

Guddiga Ilbaadinta wuxuu ku samayn karaa Hay'adda kormeerro xilliyeed ah iyo kuwo aan caadi ahayn, kaaso siinaya kan loo xilsaaray kormeerka macluumaad kasta iyo in la tusiyo diiwaanada idil, qoraalada iyo dokumentiyada la weydiisto.

**CINWAANKA 8AAD**
Dammaanadda Qof Ahaaneed

**Qod. 21**

Shaqaalaha xilalka haya waxaa waajib ku ah in qaadaan dammanadaha soo socda:

— Kooxda A (hoggaamiyeyaasha) dammaanadda xilka illaa kolba heerka Golaha maamulku uu jideeyo;
— Kooxda B (saraakiisha) u xilsaaran faracyada xaafadaha ee Hay'adda, dammaanadda xilka isbiirsaday iyo adegyada khasnadda illaa heerka kolba uu jideeyo Nidaamka shaqaalaha;
— Qaybta khasnadda, dammaanadda adeegga khasnadda illaa heerka kolba uu jideeyo Nidaamka shaqaalaha.

## CINWANKA 9AAD

Kala dirista Guddiga Maamulka – Gelinta xaq-gudidda

### Qod. 22

Marka kormeerka uu sameeyay Guddiga Ilbaadinta ay soo baxdo khaldaad iyo ama xadgudub xagga xeerarka, nidaamyada iyo shuruuc kale oo nidaaminaya maaaraynta Hay'adda, oo Guddiga Ilbaadinta isaga uu soo jeediyo lana helo talooyinka Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha oo dhagaystay Golaha Wasiirada, maamuluhu wuxuu qaadayaa tallooaabooyinka arrinta wuxuuna xitaa awoodaa in uu dekereeto ku kala diro Guddigaga Golaha maamulka isla markaana uu magaacaabo Guddoomiye ku-meelgaara.

### Qod. 23

Marka uu soo jeediyo Guddiga Ilbaadinta iyo helo talada Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, lana dhagaysto Golaha Wasiirada, Maamuluhu wuxuu amrayaa kala dirista wuxuuna gelinaya xaq-gudi Hay'adda, iyadoo hawshaas u qabanayo guddoomiye isagu uu magacaabo:

a) marka la xaqiijiyo khaldaad culus iyo xadgudub xagga xeerarka, nidaamyada ama shuruuc kale oo nidaaminaya maareynta Hay'adda;
b) Marka la xaqiijiyo khaasare isku fuuqsanaya, wax ka badan hantida keydka taalla, oo ka badan kala barka hantida Hay'adda;
c) Marka la xaqiijiyo u qalmid la'aanta Hay'adda gaarista hadafkeed.

Marka lakala diro Hay'adda, Maamulha Soomaaliya, uuna soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, oo dhagaystay Golaha Wasiirada, wuxuu dekereeto ku amrayaa wareejinta hantida saafiga ee Hay'adda si danta guud ku jirto.

## CINWAANKA 10AAD

### Qod. 24

Xeerkaan wuxuu baddalayaa, dhaqangalkiisa oo idil kii ka horreeyay, oo lagu meelmariyay dekereetada Maamulha lamba. 35 ee 31 Jannaayo 1954, wuxuuna dhaqangalayaa taariikhda lagu baahiyo Faafinta Rasmiga.